JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**SHARCI LR.005**
**OGOLAANSHO ANSAXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA**

**Taariikh:20 Maarso 2023**

## MADAXWEYNAHA J.F.S.,

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/0255/B11/23**, ku taariikheysan **19/03/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Dhowrista Xogta Dadweynaha.**

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Dhowista Xogta Dadweynaha.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
22 MAR 2023
BY: Liban Xasan Cfladi
SAACAD 08:00 SAXIIX

**Madaxweynaha J. F.S**
**Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud**

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA — OFFICE OF THE PRESIDENT

**Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya**
**Golaha Shacabka**
**Xafiiska Guddoomiyaha**

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
**مجلس الشعب**
**مكتب الرئيس**

**Federal Republic of Somalia**
**House of the People**
**Office of the Speaker**

**Tix:** XGGSH/0255/B11/23:الرقم

**Mogadishu,** Maarso 19, 2023 التاريخ

**Ku:** **Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Ujeeddo:** **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Dhowrista Xogta Dadweynaha**

M.ne Madaxweyne;

Waxaan si waafaqasan Qodobka 82aad Faqaradda 3aad ee Dastuurka KMG halkan kuugu soo gudbinaynaa Nuqulka Rasmiga ah ee ***Hindise Sharciyeedka Dhowrista Xogta Dadweynaha*** oo Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare mid walba gaarkiisa u soo ansixiyey.

***Hindise Sharciyeedka Dhowrista Xogta Dadweynaha*** wuxuu Golaha Shacabka soo gaaray taariikhdu markay aheyd ***Febraayo 13, 2023*** wuxuuna maray dhammaan habraacyada kala duwan ee akhrinta 1aad, 2aad iyo 3aad. Golaha Shacabka wuxuu si waafaqsan Qodobka 82(1)(a) ee Dastuurka KMG hindisahan ansixiyey ***Maarso 8, 2023,*** isla ***Maarso 9, 2023*** waxaa loo gudbiyey Golaha Aqalka Sare si ay waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan. Golaha Aqalka Sare wuxuu dhankiisa ku ansixiyey isla nuqulkii Golaha Shacabka oo aan waxba laga beddelin si waafaqsan Qodobka 82(2)(a) ee Dastuurka KMG, waxayna dib ugu soo celiyeen Golaha Shacabka ***Maarso 18, 2023.***

Haddaba, M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqasan Qodobka 90(f) ee Dstuurka KMG kaaga codsanaynaa in ***Hindise Sharciyeedka Dhowrista Xogta Dadweynaha*** ku meelmariso Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah una noqdo sharci, si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Naga Guddoon Salaan Qiimo Badan.

**M.ne Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka.
Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Hantidhowrka Guud Qaranka.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda Golaha Shacabka.

Tell: +252 616641550/+252 618153111
E-mail. speaker@parliament.gov.so
Website: www.parliament.gov.so

**BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA**
**GOLAHA SHACABKA**

# SHARCIGA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS |
|---|
| M.ne Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad Golaha Shacabka BJFS |
|---|
| Marwo Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad Golaha Shacabka BJFS |
|---|
| M.ne Cabdullahi Cumar Abshir "Abshirow" |

Maarso 19, 2023

**Ref: XGK1/26/B11/2023** :الرقم

**Taariikh: 18/03/2023** :التاريخ

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:-Guddiga Khayraadka Aqlka Sare ee BFS =Muqdisho=
Og:- Wasaaradda Kalluumeysiga X.F.S. =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo:**

**Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran kadib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix: GAS/B-11/KF2/ 11 /2023** kuna taariikheysan **16 Maarso 2023** kuna ansixiyay Goluhu Sharciga **Dhowrista Xogta Dadweynaha:**

- Waxaa codeeyay **30 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **30 Senatar.**
- Waxaa diiday: **0 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **0 Senatar.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay.

Iga guddoon qadarin.

**Sen. Cali Shacbaan Ibraahim**
**Ku Xigeenka 1aad Ahna Kusimaha**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 18-3-2023
TIX: 68
SAXIIX:
GELID

# ANSIXINTA SHARCIGA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 30 | 30 | 0 | 0 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cali Shacbaan Ibraahim | Taariikh: 16 Mar, 2023 |

| Ku-xigeenka Xoghayaha Guud ahana ku-simaha Xoghayaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Cabdullaahi Xaaji Geeddi | Taariikh: 16 Mar, 2023 |

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA AQALKA SARE
## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## QARAAR GOLE
## ANSIXINTA SHARCIGA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA

**Muqdisho,**
**16 Maarso, 2023**

**Tix**: GAS/B-11/KF2/##/23
Kalfadhiga 2[aad]
Kulankiisa 25[aad]

**Taariikh**: 16 Maarso, 2023

## GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**MARKUU AKHRIYAY:**

Sharciga "**Dhowrista Xogta Dadweynaha** oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya soona gaaray Golaha Aqalka Sare 11 **Maarso 2023** si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.82[aad]** iyo **Qod.83[aad]** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.50[aad]** iyo **Qod.51[aad] (4)** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.61[aad] (1) (3)** ee Dastuurka KMG ah.

**MARKUU TIXGELIYAY:**

Soo jeedinta in Sharciga **Dhowrista Xogta Dadweynaha** loo ansixiyo sida uu uga soo gudbay Golaha Shacabka ee B.F.S.

**MARKUU GAROWSADAY:**

In danta guud ee Dalku ku jirto in la meel mariyo Sharciga **Dhowrista Xogta Dadweynaha**.

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiga **2aad**, kulankiisa **25aad**, oo ay soo xaadireen **31 Senatar** (Soddon iyo koow Senator).

## WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

### Qod.1aad

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod aqlabiyad leh ku ansixiyay Sharciga **Dhowrista Xogta Dadweynaha** isaga oo aan waxba ka beddelin.

### Qod.2aad

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

**Sen. Cali Shacbaan Ibraahim**
**Ku Xigeenka 1aad Ahna Ku-simaha**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Aqalka Sare**

**Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda ,Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska.**

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ

لجنة الاقتصاد ، الموازنة العامة ، التجارة ، الصناعات ، الاتصالات والسياحة

**Federal Republic of Somalia**

**The Upper House**

Committee for Economy, Budget, Commerce, Industries, Telecommunication and Tourism

**Ref: DMGWID/B-11/112/23** **Taariikh: 16 Maarso, 2023**

Ku: Guddoonka Golaha Aqalka Sare

Ku: Xubnaha Golaha Aqalka Sare

**Ujeeddo: Soo jeedinta Akhrinta warbixinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Dhowrista Xogta Dadweynaha**

Mudane Guddoomiye,
Senatorrada sharafta leh,

Guddiga Dhaqaalaha, Maaliyadda, Ganacsiga, Warshadaha, Isgaarsiinta iyo Dalxiiska Aqalka Sare ee **BFS.** wuxuu Hindise-sharciyeedkan akhrintii 2aad ka hor akhriyay Aqalka Sare **14 Marso, 2023.**
Guddigu wuxuu dhegeystay talooyinkii iyo soo jeedinnadii wax ku oolka ahaa oo ay Sanatorradu u soo gudbiyeen Guddiga intii ay socotay akhrintii 2aad.

Waxaan halkan idinkaga soo gudbineynaa soo jeedinnada qaar ka mid senatorrada oo la xariira hindise-sharciyeedka.

Qaar ka mid ah sentorradu waxay ka hadleen qodobka 9aad oo khuseeya xubnaha hay'adda, iyaga oo soo jeediyay in uusan Maareeyuhu ka mid noqon Maamulka Hay'adda.

Guddigu, wuxu la akhriyay soo jeedinnadaan Sharciyo horey uu Aqalku ansixiyay, oo sidan oo kale uu Maareeyuhu ka mid ahaa Maamulka Hay'adda sida sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangelinta Dadweynaha, wuxuuna ku qancay in sidiisa loo daayo.

**Sentorrada Sharafte leh**

Ugu dambeyn, waxaan idinka codsaneynaa in aad hindise-sharciyeedkan u aqbshaan sida uu Guddigu u arkay kuna ansixaan sida uu yahay.

**Mahadsanidiin**

**Xubnaha Guddiga**

1. Sen. Cabdi Axmed Dhuxulow (Dhegdheer)
2. Sen. Ibrahim Awgaab Cusmaan
3. Sen. Abdisamed Yuusuf Maxamed
4. Sen. Leyla Axmed Ismaaciil
5. Sen. Farxaan Cali Maxamuud
6. Sen. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Faroole)
7. Sen. Cabdixakiim Macallin Axmed Maalin

Sen. Ibrahim Awgaab Cusmaan
guddoomiye ku xigeeenka Guddiga
ahna K/S Guddoomiyaha

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: XGGSH/0224/B-11/23 :الرقم

Mogadishu, March 9, 2023: التاريخ

Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare.
Og: Madaxweynaha Jamahuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
Og: Ra'iisal Wasaaraha Xukuumada JFS.
Og: Wasaaradda Maaliyadda.
Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda.
Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.
Og: Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka.

UJEEDO: ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA XOGTA

Mudane Guddoomiye,
Mudanayaal,

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinayaa, si aad waajibaadkiina uga gudataan Ansixinta **Hindise Sharciyeedka Dhowrista Xogta**. Goluhu wuxuu ku ansixiyay Hindise Sharciyeedkaan kalfadhigiisa 2aad, kulankiisa 27aad taariikhdu markay ahayd **8/03/2023**, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

| | |
|---|---|
| **Koramka:** | **143** |
| **Oggol:** | **143** |
| **Diiday:** | **0** |
| **Ka aamustay:** | **0** |

Naga guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaar ah

**M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka JJFS**

Tell: +252 616641550/+252 618153111
E-mail. speaker@parliament.gov.so
Website: www.parliament.gov.so

# ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA XOGTA

Tirada Xubnaha Codeysay: 143

Oggol: 143;

Diiday: 0;

Ka Aamustay: 0;

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| M.ne Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" | Tar: 09/03/2023 |

| Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. | |
|---|---|
| M.ne Cabdiraxmaan Maxamed Cabdulle (Jaabiri) | Tar: 06/03/2023 |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Tixraac:XRW/069/02/2023**

**Taariikh: 09/02/2023**

**Ku: Guddoonka Golaha Shacabka JFS**

**=Muqdisho=**

**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**=Muqdisho=**

**Ujeeddo: - <u>Soo Gudbin Hindise-sharciyeedka Dhawrista Xogta</u>**

**Mudane Guddoomiye,**

Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada summaddiisuna tahay **SHGW.00.22.02.23 ee 09/02/2023**, kuna saabsan ansixinta "**<u>Hindise sharciyeedka</u> Dhawrista Xogta**" oo uu Goluhu cod aqlabiyad leh ku ansixiyey.

Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa **"Hindise-sharciyeedka sare ku xusan"** si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah, waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Dhawrista Xogta"** maadaama baahi weyn loo qabo meel marinta.

**Xiriir iyo wada shaqeyn wacan.**

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
TAR: 13-2-2023
TIX: 117
SAXIIX:
GELID

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

---

**Tixraac:XRW/104 /02/2023**

**Tariikh: 09/02/2023**

**Ku: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolajiyadda** **=Muqdisho=**
**Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada** **=Muqdisho=**
**Og: Guddonka Golaha Shacabka JFS** **=Muqdisho=**
**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya** **=Muqdisho=**

**Ujeeddo:** **Go'aan Gole, Ansixinta "Hindise Sharciyeedka dhawrista Xogta"**

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99 aad farqadaha (a), (b), (e) ee Dastuurka KMG

**Markuu arkay:** Qodobka 100 aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tekanoolajiyada

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.22.02.23 ee 09/02/2023,** kuna saabsan ansixinta **"Hindise Sharciyeedka dhawrista Xogta"** oo uu Goluhu cod Aqlabiyad ku ansixiyey.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda uu dalka u leeyahay Hindise Sharciyeedka Dhowrista Xogta.

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1aad**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.22.002.23** ee **09/02/2023,** kuna saabsan ansixinta **Hindise-sharciyeedka Dhawrista Xogta** oo uu Goluhu ansixiyey.

<u>Qodobka 2aad</u>

In "**Hindise-Sharciyeedka Dhawrista Xogta**" si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka, si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA OFFICE OF THE PRIME MINISTER FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

**Mudane, Hamza Cabdi Barre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

Villa Somalia, Telephone +252-615-233036E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada
Xafiiska Wasiir ku-xigeenka

جمـــهورية الصـومال الفيدراليـــة
وزارة الإتصالات والتكنولـوجيا
مكتب نائب الوزير

**Federal Republic of Somalia**
**The Ministry of Communications & Technology**
**Office of The Deputy Minister**

**Ref: WIT/XWKX/** 006 **/2023**

**Taarikh: 31/01/2023**

**Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**
**Og: Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS** **=Muqdisho=**
**Og: Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada** **=Muqdisho=**
**Og: Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada** **=Muqdisho=**
**=Muqdisho=**

**Ujeeddo: Soo gudbin Hindise Sharciyeedka Dhawrista Xogta**

Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada XJFS, waxay si xushmad leh halkan kusoo gudbinaysaa Hindise Sharciyeedka Dhawrista Xogta.

Diyaarinta Hindise Sharciyeedkan waxaa eegis ku sameeyay Sharci yaqaanada Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada JFS. Wasaaradda Caddaaladda iyo Garyaqaanka Guud ee Dowladda si loo hubiyo inuu waafaqsan yahay Shuruucda Dalka.

Haddaba, Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada XJFS waxay ka codsanaysaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha in Hindise Sharciyeedkan loo gudbiyo Xubnaha Golaha Wasiirada si loo ansixiyo.

Wada shaqayn wacan.

MINISTRY OF COMMUNICATIONS & TECHNOLOGY · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · WASAARADDA ISGAARSIINTA & TEKNOLOJIYADA

**Xildh. Xuseen Axmed Culusow**
**Wasiir Ku-Xigeenka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada**

P.O. Box: 66, BN03010, Mogadishu - Somalia
Via Republic, Mogadishu, Somalia. E-mail: deputyminister@moct.gov.so

**SUMMAD: XGG/058/2023**

**06/02/2023**

**Ku: Agaasimaha Golaha wasiirradda**
**Ku: Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada** **Muqdisho**
**Og: Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka XFS** **Muqdisho**
**Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS** **Muqdisho**
**Muqdisho**

**Ujeeddo: Talo Sharci**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda oo tixraacaya Warqadda **Ref: WC&AD/XAG/165/02/2023**, ee taariikh **05/02/2023**, kana Soo baxay Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka, Ujeeddadeeduna ahayd **Soo Gudbin Hindise-sharciyeedka Dhawrista Xogta.**

Sidaa daraadeed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Sharci Lr. 18 ee 29 janaayo 1976, ayaa waxa uu idin soo gudbinayaa **"Hindise Sharciyeedka Dhawrista Xogta"** oo ay Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka u soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa Shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Hadaba, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda markuu darsay, kuna sameeyay hagaajin iyo sixid kuna biiriyay farsamo aan looga maarmin sameynta Hindise-sharciyeedkan, ayaa waxa uu ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha wasiirada, maadaama aysan ka hor-imaanayn Dastuurka, Shuruucda Dalka iyo Danta Guud, uuna Xafiiska ka gutay waajibaadkiisa Shaqo ee kaga aadanaa, si waafaqsan Sharciga.

**FG**: halkaan waxaa ku lifaaqan Hindise-sharciyeedka Sare ku xusan.

Salaan qadarin leh

**Avv. Xuseen Xasan C/llaahi**
**Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dowladda**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA · OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL · مكتب المحامي العام للدولة

# JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# HINDISE SHARCIYEEDKA DHOWRISTA XOGTA DADWEYNAHA

GOLAHA AQALKA SARE
THE UPPER HOUSE
11 MAR 2023
SOO GELID/RECEIVED

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC
HOUSE OF THE PEOPLE
GOLAHA SHACABKA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

Tusmo:

CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD....1
Qodobka 1aad: Magaca Sharciga....1
Qodobka 2aad: Eray Bixin....1
Qodobka 3aad: Ujeeddooyinka Sharciga....3
Qodobka 4: Baaxadda Sharciga....3
Qodobka 5aad: Reebid....4
CUTUBKA 2AAD: MAAMULKA....5
Qodobka 6: Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha....5
Qodobka 7aad: Waajibaadka, Awoodaha Iyo Shaqooyinka Hay'adda....6
Qodobka 8aad: Dhisidda Guddiga Maamul ee Hay'adda....7
Qodobka 9aad: Xubnaha Hay'adda....8
Qodobka 10aad: Maareeyaha Guud Iyo Hawl-Wadeennada Hay'adda....9
Qodobka 11aad: Xil Ka Qaadista Xubin Kamid Ah Guddiga Maamulka Ama Maareeyaha Guud....10
Qodobka 12aad: Iska-horimaadka Danaha....10
CUTUBKA 3AAD: MABAADI'DA LAGU MAAMULAYO ADEEGSIGA XOGTA SHAKHSIGA AH....11
Qodobka 13aad: Aasaaska Hay'adda Dhowrista Xogta....11
Qodobka 14aad: Sharci Ahaanshaha Adeegsiga Xogta Shakhsiga Ah....12
Qodobka 15aad: Faafaahinta Ujeedka, Yaraynta Xogta, Keydinta Iyo Saxsanaanta....13
Qodobka 16aad: Caruurta Iyo Dadka Kale Ee Aan Lahayn Awood Sharci....14
Qodobka 17aad: Saamaynta Oggolaanshaha Qofka Xogta Laga Qaaday....15
Qodobka 18aad: Siinta Macluumaad Qofka Xogta Leh....15
Qodobka 19aad: Mas'uuliyadda Degsashada Xogta Shakhsiga....15
CUTUBKA 4AAD: XUQUUQDA QOFKA XOGTA LEH....16
Qodobka 20aad: Xuquuqda Xaqiijinta, Gelitaanka, Sixidda Iyo Tirtiridda....16
Qodobka 21aad: Xaqa Ka Noqoshada Ogolaanshaha....17
Qodobka 22aad: Xaqa Diidmada....17
Qodobka 23aad: Xaqa in Uusan Masuul Ka Aheyn Go'aan Ku Saleysan Keliya Aaladaha Xogta Farsameeya....17
CUTUBKA 5AAD: AMNIGA XOGTA IYO QIIMAYNTA SAAMAYNTA XOGTA....18
Qodobka 24aad: Amniga, Hufnaanta, Iyo Sir-Ahaanshaha Xogta Shakhsiga Ah....18

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA / FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA / THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC

Qodobka 25aad: Ogeysiisyada Jabsashada Xogta....19
Qodobka 26aad: Nuxurka Ogeysiisyada Jabsashada Xogta Iyo Wargelinta....20
Qodobka 27aad: Diiwaangelinta Jabsashada Xogta....21
Qodobka 28aad: Hagidda Hay'adda....21
Qodobka 29aad: Qiimaynta Saamaynta Ilaalinta Xogta....21
CUTUBKA 6AAD: GUDBINTA XUDUUDDA EE XOGTA SHAKHSIGA AH....22
Qodobka 30aad: Heerka Ilaalin Eek U Habboon Gudbinta Xuduudaha Ee Xogta Shakhsiga Ah....22
Qodobka 31aad: Ka Gudbinta Xudduudaha Marka Aysan Jirin Ilaalin Ku Habboon....24
CUTUBKA 7AAD: DIIWAANGELINTA IYO KHIDMADAHA....25
Qodobka 32aad: Diiwaangelinta Maamulayaasha Xogta Ee Muhiimka Ah....25
Qodobka 33aad: Khidmadaha Iyo Canshuuraha....26
Qodobka 34aad: Magacaabidda Saraakiisha Xog Dhowrista....27
CUTUBKA 8AAD: FULINTA....27
Qodobka 35aad: Cabashooyinka....27
Qodobka 36aad: Baaritaannada....28
Qodobka 37aad: Ammaradda Hay'adda....28
Qodobka 38aad: U Hogaansamid La'aanta Amarka Hay'adda....29
Qodobka 39aad: Racfaan Ka Qaadashada Amarka Hay'adda....29
Qodobka 40aad: Magdhow Madani ah....29
CUTUBKA 9AAD: QODOBBO QUBANE AH....30
Qodobka 41aad: Awoodda Soo Saarista Xeer-Hoosaad....30
Qodobka 42aad: Burin....30
Qodobka 43aad: Dhaqan-galka....30

## CUTUBKA 1AAD: QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad: Magaca Sharciga

Sharciga waxaa lagu magacaabaa Sharciga Dhowrista Xogta Dadweynaha.

### Qodobka 2aad: Eray Bixin

Haddii aan si kale loogu sheegin xeerkan gudihiisa, ereyada hoos ku qoran mid waliba wuxuu leeyahay macnaha ku hor qoran:

1. **Hay'adda:** waxaa loola jeedaa Hay'adda Dhawrista Xogta Dadweynaha, ee lagu dhisay Qodobka 6aad ee sharcigan.
2. **Xeerarka Shirkadaha:** Waxaa loola jeedaa siyaasadaha iyo habraacyada ilaalinta xogta gaarka ah ee ay u hoggaansamayaan koox shirkado ah oo wadaaga maamul guud marka ay isku gudbinayaan xogta shakhsiga ah.
3. **Xog-dhalyada:** Waxaa loola jeedaa tilmaamaha la xiriira waxyaabaha u goonida ah qofka ee lagu ogaado farsameyn gaar ah oo lagu sameeyay jirkiisa ama hab-dhaqankiisa si loo aqoonsado, xaqiijiyana aqoonsigiisa gaarka ah, sida cabbirada jirka, muuqaalka wajiga, nooca dhiigga, faraha, indhaha, codka, iyo falanqeynta baarista hidde-sidaha (DNA).
4. **Habka Hubinta:** Waxaa loola jeedaa habka ay Hay'addu ama koox kale oo dhinac seddexaad ah oo ay Hay'addu aqoonsantahay ay ku xaqiijineyso in siyaasadaha dhowrista xogta shakhsiga ah iyo habraacyada xog-maamulayaasha ama xog-adeegsadayaashu ay waafaqsan yihiin halbeegyo gaar ah oo lagu qiimeynayo.
5. **Carruur:** Waxaa loola jeedaa qofkasta oo aan qaan gaarin sharci ahaan marka loo eego da'da qaangaarka ee uu qabo Dastuurka KMG.
6. **Oggolaansho:** Waxaa loola jeedaa wax walba oo muujinaya raali ahaanshaha qofka oo isaga oo xor ah si aan mugdi ku jirin uu ku aqbalay arrin cayiman si qoraal, hadal, ama ficil ah.
7. **Xog-dhowre:** Waxaa loola jeedaa shakhsi, shirkad, hay'ad iyo wakaalad dowladeed, oo keligeed ah ama iyada oo la jirta kuwa kale, go'aamisana ujeeddooyinka iyo qaababka adeegsiga xogta gaarka ah.

8. **Xogdhowraha Haya Xogta Muhiimka ah:** waxaa loola jeedaa Xog-dhowraha deggan, fadhigiisu yahay ama ka hawlgala Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, maamulana xogta shakhsiyaadka ee oo ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
9. **Xog-adeegsade:** Waxaa loola jeedaa shakhsi, shirkad gaar loo leeyahay, hay'ad dowladeed ama wakaalad ama hay'ad kasta oo kale oo isticmaaleysa xogta shakhsiga ah, iyada oo wakiil ka ah ama hoos tagta xog-maamule ama xog-adeegsade kale;
10. **Qofka xogta leh:** Waxaa loola jeedaa qofka ay xogta shakhsiyeed la xiriirto ama laga hayo.
11. Wasiirka: Waxaa loola jeedaa Wasiirka Isgaarsiinta iyo Tiknoloojiyada ama wasiir kasta oo kale ee loo xilsaaray mas'uuliyadda dhowrista xogta.
12. **Xogta Shakhsiga ah:** waxaa loola jeedaa xog kasta oo la xiriirta qof laguna aqoonsan karo qofkaasi, si toos ah ama si dadban, sida magac, tirsi aqoonsi, xogta deegaankiisa, aqoonsiga internetka, ama hal ama dhowr arrimood oo u gaar ah qofkaasi oo ku saabsan aqoonsigiisa jireed, maskaxeed, hidde-side, dhaqameed, bulsheed ama dhaqaale.
13. **Jabsashada Xogta Shakhsiga ah:** Waxaa loola jeedaa dayaca amniga xogta qofeed ee xog-dhowraha ama xog-adeegsadaha kaas oo keenaya ama laga yaabo in uu keeno xadgudub shil ah ama sharcidarro ah oo lagu sameeyo xogtaasi sida burburinteeda, tirtirdideeda, wax-ka-beddelkeeda ama shaacinteeda/bandhigiddeeda ama heliddeeda si aan la oggoleyn.
14. **Adeegsiga Xogta:** waxaa loola jeedaa uruurinta, diiwaangelinta, nidaamինta, kaydinta, wax-ka-beddelka, shaacinta, gudbinta, isku-darka, xaddidaadda, ama burburinta xogta shakhsiga ah iyadoo la adeegsanayo hab elektaroonik ah.
15. **Xogta Shakhsiyeed ee Xasaasiga ah:** waxaa loola jeedaa xogta shakhsi ee la xiriirta:
    a. Xog-dhalyada qofka;
    b. Isirka iyo qowmiyadda qofka;
    c. Xaaladda caafimaad;
    d. Diinta shakhsiga uu aaminsanyahay.
    e. Xaaladda guur ama guur la'aanta; ama nolosha jinsiyeed;
    f. aragtida ama xubinnimada siyaasadeed;
    g. Xog kasta oo kale ooHay'adda ku caddeeyso xeer-nidaamiye in ay tahay xog shakhsiyeed oo xasaasi ah.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA GOLAHA SHACABKA HOUSE OF THE PEOPLE

## Qodobka 3aad: Ujeeddooyinka Sharciga

Ujeeddooyinka Sharcigan waa:

1. In laga ilaaliyo xogta shakhsiyaadka khataraha ka dhalanaya adeegsiga xogtooda gaarka ah, oo ay kamid tahay khataraha ka dhanka ah xuquuqdooda iyo xorriyadahooda ku xusan Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. kor u qaadida nidaamka adeegsi ee ilaalinaya amniga xogta gaarka ah iyo sirta dadka;
3. Hubinta in xogta gaarka ah loo adeegsado si cadaalad ah, sharciga waafaqsan isla xisaabtana leh;
4. Fududeynta In si sugan oo ammaan ah loogu wareejiyo xogta shakhsiga ah ee ku saabsan muwaadiniinta iyo dadka degan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee ay hayaan hay'adaha caalamiga ahi, hay'adaha dowladda ee ku habboon, iyadoo loogu gol leeyahay bixinta adeegyada iyo fulinta hawlaha dowladda;
5. Sameynta qaab-dhismeed ay dowladda si amni leh ugu adeegsato xogta shakhsiga ah si kor loogu qaado badqabka shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo
6. Kordhinta ka faa'ideysiga xogta shakhsiyeed si loogu isticmaalo dhaqaalaha dhijitaalka ah (digital economy) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya loogana qeyb galo dhaqaalaha gobolka iyo Kan caalamiga ah.
7. In Lagu dhiso Hay, ad u gaar ah ilaalinta, nidaaminta iyo korjoogteynta Xogta Gaarka ah ee dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo tan shaqsi ee la xariirta muwaadiniinta Soomaaliyeed.

## Qodobka 4: Baaxadda Sharciga

Sharcigan waxaa lagu dabaqayaa keliya xog-dhowrayaasha marka:

1. Xog-dhowruhu uu degan yahay, fadhigiisu yahay ama uu ka hawlgalo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Adeegsiga xogta lagu sameynayo gudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya; ama
3. Adeegsiga xogta ay la xiriirto la socodka hab-dhaqanka, ama u bandhigiddda badeecado ama adeegyo, qof jooga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC
HOUSE OF THE PEOPLE

## Qodobka 5aad: Reebid

1. Sharcigani laguma dabaqayo xogta shakhsiga ah ee looga gol leeyahay keliya ujeeddooyin madadaalo ama arrimo guri; Sharcigaan waxaa lagu dabqayaa xogdhoraha heysta, deggan jamhuuriyada federaalka soomaaliya iyadoo aan loo kala sooceynin shakhsi, hay'ad ama wakaalad dowladeed.
2. Si waafaqsan faqradda 3-aad, sharcigan laguma dabaqayo xog-dhowraha deggan, fadhigiisu yahay ama ka hawlgala Soomaaliya haddii:
    a. Uu adeegsanayo xogta shakhsiga ah ee deggan dalka;
    b. Uusan aheyn xog-dhowre muhiim ah, ilaa laga gaarayo sannad-guurada 1aad ee taariikhda uu dhaqangalayo sharcigan.
    c. Sharcigani laguma dabaqayo adeegsiga xogta shakhsiga ah ee la xiriirta:
    d. Hay'adaha dowladeed ee awoodda u leh ka-hortagga, baarista, ogaanshaha, dacwad ku-oogista, garsooridda dembiyada iyo fulinta ciqaabta dembiyada;
    e. Hay'adaha dowladeed ee awoodda u leh ka-hortaga ama xakamaynta xaalad degdeg ah oo khuseysa caafimaadka guud ee dadweynaha;
    f. Hay'adaha dowladeed ee lagama-maarmaanka u ah amniga qaranka; ama Xogta lagama maarmaanka u ah billaabidda, dhaqan-gelinta iyo difaaca dacwadaha sharciga ah ee maxkamadda horteeda, habraaca hay'ad maamul ama hababka xallinta khilaafaadka ee ka baxsan maxkamadda
3. Waxaase shardi ah in adeegsigooda uu ku qotomo tillaabooyin macquulgal ah, cadaalad ah, waxku'oolna ah oo ilaalinaya xuquuqda iyo danaha aasaasiga ah ee shaqsiyaadka xogta leh
4. Sharcigan ma khuseeyo adeegsiga xogta ee loogu dan leeyahay ujeeddooyin saxaafadeed, waxbarasho, farshaxan ama suugaaneed, inta aysan ku xadgudbeyn waajibaadka iyo xuquuqaha ku jira Sharcigan.

## CUTUBKA 2AAD: MAAMULKA

### Qodobka 6: Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha

1. Sharcigan waxa uu dhisayaa Hay'adda Dhowrista Xogta Dadweynaha oo leh shakhsiyad qaanuuni ah, awoodna u leh in ay hanti mulkiso, heshiis gasho, waajibaadna lagu yeesho, taas oo lasoo dacweyn karo waxna dacweyn karta iyada oo adeegsaneysa magaceeda si waafaqsan habraacyada is-difaacidda iyo dacwad oogista hay'adaha dowladda.
2. Hay'adda waxay noqoneysaa hay'ad cusub oo madaxbannaan lehna shaqooyin, awooddo iyo waajibaad si waafaqsan sharcigan, marka:
   a. Uu Baarlamanka Federaalka Soomaaliya ee labadiisa gole ansixiyaan sharcigaan, madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee dowladda Soomaaliyana uu saxiixo.
   b. Marka la magacaabo Maareyaha Hay, adda, kaas oo mas'uul ka noqonaya Hay, adda la dhisay.
3. Haddii aan sharcigan si kale loogu sheegin, Hay'adda waxa ay u madax-banaan tahay gudashada waajibaadkeeda sida ku xusan sharcigan, wax faragalin ahna kuma yeelan karaan Wasiirka iyo Hay'adaha kale ee Dowladda.
4. Iyadoo aan loo eegeyn faqradda 3-aad ee qodobkan, Hay'addu:
   a. Waxa ay tixgelinaysaa tilmaamaha guud iyo siyaasadaha uu ku hago sharcigaan iyo haddii ay soo baxaan shuruuc kale oo dowladdu soo saarto;
   b. Waxa ay u hoggaansameysaa tilmaamaha Madaxweynaha, ama Golaha Wasiirada iyadoo la eegayo danaha amniga qaranka, nabadgelyada guud iyo difaaca qaranka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
5. Dakhliga Hay'adda ay ku socodsiineyso hawlaheeda waxa uu ka kooban yahay:
   a. Qoondadeeda miisaaniyadda guud ee Dowladda; iyo
   b. Dakhliga ka soo gala ganaaxyada maamul, khidmadaha, canshuuraha iyo ganaaxyada lagu sameeyo Sharcigan.
6. Hay'addu waxa ay diyaarineysaa, faafineysaa una gudbineysaa Wasiirka warbixin, taas oo la xiriirta hawlaheeda sannadkii hore.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE · AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA · THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC · HOUSE OF THE PEOPLE · GOLAHA SHACABKA

## Qodobka 7aad: Waajibaadka, Awoodaha Iyo Shaqooyinka Hay'adda

1. Hay'addu waa inay sare u qaaddaa dhowrista xogta shakhsiga ah, islamarkaana la socotaa dhaqangelinta sharcigan, waxayna mas'uul ka tahay inay ku fuliso Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Hay'addu waxay leedahay awoodaha ku qeexan xeerkan, waxayna qabaneysaa shaqooyinka soo socda:
    a. Waxay kobcineysaa wacyiga xarumaha dowladda ee diiwangeliya ama haya xogta gaarka ah ee ku aadan khataraha la xiriira xogta dadweynaha ee shakhsiga ah, dhowrista xogtooda gaarka ah, xuquuqda ay leeyihiin iyo waajibaadka uu saarayo sharcigan;
    b. Waxay hubineysaa in la meelmariyo soo-jeedinnada tallaabooyinka tiknoolajiyada iyo maamulka si kor loogu qaado ilaalinta xogta shakhsiga ah si waafaqsan halbeegyada caalamiga ah ee la aqoonsan yahay iyo shuruucda caalamiga ah ee ku habboon;
    c. Waxay ka qeyb galeysaa madallada caalamiga ah, waxayna la falgaleysaa hay'adaha kale ee dalalka, gobolka iyo kuwa caalamiga ah ee mas'uulka ka ah dhowrista xogta iyada oo mudnaanta siineysa dhisidda qaabab joogto ah oo hufan si loo maareeyo isu-gudbinta xogta shakhsiyeed ee xudduudaha;
    d. Waxay ku korjoogteyneysaa dhamaan hay'addaha dowladda iney fuliyaan siyaasadaha la xiriira dhowrista xogta gaarka ah ee uu dhigayo sharcigaan iyo kuwa caalamiga ah;
    e. Waxay soo gudbineysaa hindise sharciyeedyada, oo ay ku jirto waxkabedelka sharciyada jira, si loo xoojiyo dhowrista xogta shakhsiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
    f. Waxay uruurineysaa ayna faafineysaa macluumaadka la xiriira dhowrista xogta gaarka ah, oo ay ku jiraan jabsashada iyo ku xad-gudubka xogta shakhsi ahaaneed;
    g. Waxay qabaneysaa cabashooyinka dadka lagu xadgudbo xogtooda gaarka, waxa ayna baaris ku sameyneysaa jabinta Sharcigan ama xeerar kasta oo kale, xeer hoosaadyada ama amarada sharcigan lagu soo saaray;

h. Waxay soo rogeysaa ganaaxyo maamul haddii la jabiyo sharcigan ama xeerar kasta oo kale, xeer hoosaadyada ama amarada sharcigaan lagu soo saaray;

i. Waxay xaddideysaa dalalka, gobollada, ururrada caalamiga ah ama waaxyaha buuxiyay ama aan buuxinin halbeegyada ilaalinta xogta gaarka ah ee loogu talagalay gudbinta xudduudaha;

j. Waxay wasaaradaha iyo dhamaan hay'adaha kale ee dowladda ku korjoogteyneysaa u hoggaansamidda xeererka caalamiga ah ee la xiriira ilaalinta xogta;

k. Waxay siineysaa Madaxweynah/Reysalwasaaraha/golaha wasiiradda kaalmo farsamo oo la xiriirta arrimaha dhowrista xogta;

l. Waxay diiwaan gelineysaa, sidoo kalena khidmado ka qaadeysaa maamulayaasha xogta ee muhiimka ah;

m. Waxay u gudbineysaa Golaha Wasiiradda iyadoo la kaashaneysa wasiirka hindisaha xeer-hoosaadka laga samaynayo sharcigan;

n. Waxa ay soo saareysaa tilmaamo iyo aragtiyo, ayna sameeneysaa soo-jeedinno iyo xeerar, ayna dul dhigeysaa hagitaanno xarumaha dowladda ee diiwangeliya ama haya xogta dadweynaha iyo hadba sida loogu baahan yahay in loo fuliyo loona sii qayaxo ku dhaqanka sharcigan; iyo

o. Waxay diiwaangelineysaa dhamaan xog-dhowrayaasha (Data Controls), Xog-deegsadayaasha (Data Processing), Saraakiisha Xog Dhowrista (Data Protection officers) iyo shirkadaha baara ama dabagal ku sameeya xog-dhowrayaasha & xog-adeegsadayaasha (Data Protection Audit).

3. Hay'addu waxay faafin kartaa hagitaanno ku saabsan hab-dhaqanka wanaagsan, iyo xeerarka anshaxa ee dhowrista xogta iyo u hoggaansanaanta Sharcigan.

## Qodobka 8aad: Dhisidda Guddiga Maamul ee Hay'adda

1. Hay' addu waxay yeelanaysaa Guddi Maamul oo ka kooban ilaa sagaal xubnood si waafaqsan godobka 5aad ee sharcigan;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA · HOUSE OF THE PEOPLE · GOLAHA SHACABKA

2. Si loo dardargeliyo dhismaha Hay'adda cusub, Xubnaha gudiga maamul waxaa lasoo magacaabayaa marka ay Hay aadu howlgasho lana dhameystiro arimaha soo socdo:
    a. Marka Maareeyaha Guud u diyaariyo dhamaan waxyaabaha lagama maarmaanka u ah dhismaha Hay' adda iyo fulinta howlaheeda
    b. Marka qoondo misaaniyadeedka Hay' adda lagu daro Miisaaniyadda Dowladda Federalka.
    c. Marka Hay' addu ay yeelato xarun rasmi ah oo ay ku gudato waajibaadkeeda
3. Maareyaha guud ee lasoo magacaabo waa inuu shaqooyinka ka horreeya magacaabista golaha sare ee hay' adda ku dhameystiro muddo aan ka badneyn 2 sano dhaqangalka sharcigaan kadib.

## Qodobka 9aad: Xubnaha Hay'adda

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa Guddi ka kooban ilaa sagaal xubnood oo kala ah:
    a. Xubin oo ka imaaneysa Wasaaradda uuna soo magacaabayo Wasiirka;
    b. Xubin oo ka imaaneysa ganacsiga gaarka loo leeyahay ee Soomaaliya, lehna khibrad aan ka yarayn Shan sano oo la xiriirta dhaqaalaha dhijitaalka ah uuna soo magacaabyo Wasiirka;
    c. Xubin oo ka socota bulshada rayidka ah oo mataleysa danaha dadka xogta leh, sidoo kalena leh khibrad aan ka yareyn Shan sano oo la xiriirta ilaalinta xogta ama ilaalinta macaamiisha, uuna soo magacaabayo Wasiirka;
    d. Qareen oo ka imaanaya Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda, uuna soo magacaabayo Garyaqaanka Guud;
    e. Maareeyaha Guud ee Hay'adda
    f. Afar xubnood oo kale oo leh khibrad aan ka yareyn Shan sano kuna xeeldheer arrimaha la xiriira dhaqaalaha dhijitaalka ah, ilaalinta xogta ama ilaalinta macaamiisha.
2. Xubinnimada Guddiga waa shaqo waqti-dhaaf ah (part-time)
3. Xubnaha Guddigu waxay heli doonaan kharash-celinta dhammaan kharashaadka uga baxa shirarka Guddiga oo la qaban doono saddexdii biloodba mar haddii aanu Maareeyaha Guud ku baaqin kulan aan caadi ahayn.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC

4. Maareeyaha Guud iyo xubnaha Guddigu waxay xilka haynayaan muddo afar sano ah oo laba jeer oo keliya la cusboonaysiin karo.
5. Xubnaha Guddigu waxay iska dhex dooranayaan Guddoomiyaha Guddiga afartii sanaba mar.
6. Waajibaadka Guddigu wuxuu ku xadidanyahay:
    a. Dejinta siyaasadda guud iyo la socodka arrimaha guud ee Hay'adda, si hufan oo waxku'ool ah loogu qabto shaqooyinka Hay'adda;
    b. Ansixinta qorshayaasha istiraatijiyadeed, qorshe-hawleedyada iyo miisaaniyadaha uu soo gudbiyo Maareeyaha Guud;
    c. Kormeerka Sharcigan iyo qorshe kasta oo istiraatijiyadeed ama qorshe-hawleed kasta oo la meel mariyay;
    d. Ansixinta warbixin-sannadeedka uu soo gudbiyo Maareeyaha Guud;
    e. Ansixinta qorshaha shaqaaleynta Hay'adda, iyadoo la tixgelinayo baahida loo qabo xirfadlayaal iyo xaddidnaanta miisaaniyadda;
    f. La socodka qodobbada iyo shuruudaha adeegga ee shaqaalaha Hay'adda, oo ay kamid tahay mushaaraadka, gunnooyinka iyo dheefaha hawlgabka;
    g. Ansixinta xeerarka anshaxa, iyo habraacyada iyo tallaabooyinka anshax-marinta hawl-wadeennada, saraakiisha iyo shaqaalaha kale ee Hay'adda oo Maareeyaha Guud soo gudbiyo;
    h. La-talinta iyo u-tusaaleynta Maareeyaha Guud;
    i. U gudbinta Golaha Wasiiradda warbixin-hawleedyada iyo horumarrada laga gaaray qorshaha maamulka Hay'adda, marka uu soo dalbadaan; iyo

## Qodobka 10aad: Maareeyaha Guud Iyo Hawl-Wadeennada Hay'adda

1. Maareeyaha Guud waa:
    a. Mas'uulka ugu sarreeya ee Hay'adda;
    b. Waxa uu u xilsaaran yahay hoggaaminta iyo maaraynta hawl-maalmeedka Hay'adda iyo hubinta inay Hay'addu gudato waajibaadkeeda ku xusan Sharcigan; sidoo kale;

c. Waxa uu leeyahay awood sharci uu ku matalo Hay'adda.

## Qodobka 11aad: Xil Ka Qaadista Xubin Kamid Ah Guddiga Maamulka Ama Maareeyaha Guud

Maareeyaha Guud ama Xubnaha hay'adda waxay xilka ku waayna karaan arrimaha soo socdo:

1. Lagu xukumay ama si kale loo shaaciyay inuu musallafay si waafaqsan sharci kasta oo dhaqangal ka ah jamhuuriyadda federaalka soomaaliya qeyb kasta oo kamid ah Soomaaliya;
2. Lagu xukumay dambi ku lug leh daacad-darro, khiyaano, wax isdaba-marin, sameyn dukumintiyo been-abuur ah ama fal-dembiyeed kasta oo ciqaabtiisu la egtahay ama ay ka badan tahay Shan sano ay ku xukuntay maxkamad.
3. In caafimaad ahaan uu dhaqtar idman oo aqoon u leh ku caddeeyo in maskax ahaan uusan taam aheyn, ama haddii uu noqdo qof aan Karin gudashada waajibkiisa jirro darteed ama dhaawac soo gaaray.
4. Haddii lagu helo faldambiyeed culus oo la xiriira waajibaadkiisa shaqo kadib baaris lagu sameeyay, laguna garsooray fadhi maxkamad oo caddaalad ah.

## Qodobka 12aad: Iska-horimaadka Danaha

1. Ma jiro xubin kamid ah Guddiga, ama Maareeyaha Guud, ama shaqaalaha Hay'adda oo maslaxad ama dan ku yeelan Kara xog-dhowre muhiim ah, ama xog-adeegsade kasta oo uu qabanayo Sharcigan, kaas oo Hay'adda marsiineyso habraacyadeeda maamul, dib-u-eegis, baaris iyo fulin.
2. Maslaxadaha ku xusan faqradda 1-aad waxaa kamid ah:
    a. Dan dhaqaale uu ku leeyahay/leedahay xaaskiisa/saygeeda, xubnaha qoyskiisa ama qaraabada kale;
    b. Dan dhaqaale ay ku leedahay/leeyahay shirkad uu saamiyo ku leeyahay ama damaanado kale oo dhaqaale, si toos ah ama si dadban;
    c. Dan dhaqaale uu ku leeyahay ama ay ku leedahay shuraakadiisa ganacsiga;

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC

d. Haddii uu dhinac ka ahaa gorgortanka, heshiis uu galay xog-dhowre, xog-adeegsade kasta oo uu matalayay, wakiil u ahaa, shaqaale u ahaa ama uu u qabanayay hawl kasta oo kale.

3. Haddii xubin kamid ah Guddiga, Maareeyaha Guud, Maareeye ku-xigeenka ama shaqaale ka tirsan Hay'adda uu maslaxad ku leeyahay sida ku xusan faqradda 1-aad, haddaba isagu/iyadu waa:

   a. Inuu Guddiga u soo bandhigo danta uu ku leeyahay xog-dhowrahaas ama xog-adeegsadahaas, uuna nafsaddiisa gees uga saaraa hawlkasta oo la xiriirta iyagu, uusana ka helin wax macluumaad ah oo ku saabsan arrintan.

   b. Waa inuu si aan kasoo laabasho laheyn markiiba ugu tanaasulaa dantaas heer ay ku qanci karaan Guddiga; ama

   c. Inuu iska casilo xilkiisa Hay'adda.

## CUTUBKA 3AAD: MABAADI'DA LAGU MAAMULAYO ADEEGSIGA XOGTA SHAKHSIGA AH

### Qodobka 13aad: Aasaaska Hay'adda Dhowrista Xogta

1. Hay'addu waxay nogonaysaa hay'ad madax bannaan si waafaqsan godobka 6aad marka xeerkan uu dhagangalo, waxayna nogonaysaa hay'ad leh dhammaan hawlaha, awoodaha iyo waajibaadka ku xusan xeerkan;

2. Hay' addu waxay yeelanaysaa Maareeyaha Guud ee hay'adda dhowrista xogta dadweynaha, waxaa soo jeedinaya magacaabistiisa wasiirka wasaaradda isla markaana waxaa ansixinaya Golaha Wasiirada waxaana xeer madaxweyne ku magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

   a. Maareeyaha Guud waa in uu khibrad u leeyahay arrimaha ilaalinta xogta, maamulka dawladda, ganacsiga ama sharciga.

   b. Maareeyaha Guud waxa uu u xilsaaranyahay gudashada hawlaha, awoodaha iyo waajibaadka Hay'adda ee ku xusan sharcigan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · THE UPPER HOUSE · AQALKA SARE

JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA · THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC · HOUSE OF THE PEOPLE · GOLAHA SHACABKA

c. Hawlaha hay' adda waxa lagu socodsiinayaa qoondada Miisaaniyadda Qaranka iyo dakhliga ka soo gala ganaaxyada maamul, khidmadaha, canshuuraha ee lagu qaado xeerkan;

3. Wasiirku waxa uu fududeenayaa maareeyaha guud inuu helo shaqaale iyo agabka ay hay'addu ku fulineyso howlaheeda.

## Qodobka 14aad: Sharci Ahaanshaha Adeegsiga Xogta Shakhsiga Ah

1. Xog-dhowraha xogta waa inuu xaqiijiyaa in xogta shakhsiga ah loo isticmaalo si caddaalad ah, hufnaan leh oo waafaqsan faqradda 2-aad.
2. Xogdhowraha xogta waa in aanu adeegsan xogta shakhsiga ah, uusan oggolaanin in la adeegsado xogta shakhsiyeed ee uu masuulka ka yahay illaa:
   a. qofka xogta leh uu oggolaaday uusana ka laaban oggolaanshihiisa in xogta loo adeegsado ujeeddooyinka cayyiman ee loo sheegay;
   b. adeegsiga uu lagama maarmaan u yahay gelidda ama fulinta heshiis lala galayo qofka xogta leh;
   c. adeegsiga uu lagama maarmaan u yahay u hoggaansamidda waajibaad sharci;
   d. adeegsiga xogta ay lama huraan u tahay billaabidda, sameynta ama iska difaacidda dacwad sharci, helidda talo sharci ama furista gal-dacwadeed;
   e. adeegsiga lagu oggolaaday sharci ayna sameeneyso hay'ad dowladeed oo awood u leh;
   f. Adeegsiga uu muhiim u yahay badbaadinta nolosha qof.
   g. Adeegsiga lagu fulinayo ujeedooyin daryeel caafimaad ama ujeeddooyin bulshada wax wanaagsan loogu qabanayo.
   h. adeegsiga uu daruuri u yahay ka- jawaabista xaalad bini'aadantinimo oo cayiman ayna suurtagal aheyn in la sameeyo sifo kale oo sharci ah oo lagu adeegsado faqraddan muddo macquul ah gudaheed;
   i. adeegsiga uu muhiim u yahay fulinta hawl dan guud ah iyo gudashada hawl rasmi ah oo loo igmaday xog-dhowraha;

j. adeegsiga waxa uu lagama maarmaan u yahay ujeedooyin la xiriira dano sharciga waafaqsan oo uu leeyahay xog-dhowraha ama dhinac saddexaad oo xogta shakhsiga si sharci ah loogu shaac-qaaday, haddii danahaasi aysan ku xadgudbeyn xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyaadka dadka xogta leh;
k. adeegsigu waxa uu lama huraan u yahay xaqiijinta ujeedooyin dan guud ah, ama ujeeddooyin taariikheed, tirakoob, ama cilmi-baaris; ama
l. Qofka xogta leh ayaa xogtiisa shakhsiga ah si kutalagal ah shaaca ugu qaaday.

3. Haddii xogta shakhsi ahaaneed loo adeegsanayo ujeeddo aan aheyn mid markii hore loo uruuriyay, waa inuu ujeedkaasi ahaadaa mid sharciga waafaqsan Lana jaanqaadaya ujeedka asalka ah ee xogta loo uruuriyay.
4. La jaanqaadidda ku xusan faqradda 3-aad waa in lagu qiimeeyaa iyadoo la eegayo:
    a. xiriirka ka dhexeeya ujeedka asalka ah iyo ujeedka dheeraadka ah la doonayo in xogta loo adeegsado;
    b. illaa inta ay xasaasi tahay xogta gaarka ah ee la adeegsanayo;
    c. cawaaqibka iyo khataraha ka dhalanaya adeegsigan dheeraadka ah;
    d. sida xogta shakhsiyeed loo uruuriyay; iyo
    e. Inay jirto ilaalin iyo dhowris ku habboon.
5. Hay'addu waxa ay xeer-hoosaadka ku sheegi kartaa tallaabooyin ay tahay in la qaado lana dhaqangeliyo marka la adeegsanayo xogta shakhsiyeed ee xasaasiga ah, qeybaha xogta shakhsiyeed ee xasaasiga ah iyo noocyada dadka xogta leh, isaga oo tixgelinaya:
    a. Khatarta waxyeello ee kasoo gaari karta qofka xogta leh, ama noocyada dadka xogta leh haddii la adeegsado xogtan shakhsiyeed ee xasaasiga ah;
    b. filashada macquulka ah ee xafidida iyo qarsoodi ka dhigidda noocan xog ee xasaasiga ah; iyo
    c. Qiimeynta tayada xog-dhowris ee la siiyay guud ahaan xogta shakshsiga ah.

## Qodobka 15aad: Faafaahinta Ujeedka, Yaraynta Xogta, Keydinta Iyo Saxsanaanta.

Xog-dhowraha xogta waa inuu xaqiijiyaa in xogta shakhsiyeed ee uu adeegsanayo ay tahay:

a. mid loogu soo uruuriyay ujeeddooyin cayiman, cad oo sharci ah, loona adeegsanin si kale oo aan la jaanqaadeyn ujeedooyinkan;

b. mid ku filan, ku habboon kuna kooban xogta ugu yar ee lagama maarmaanka ah;
c. mid uu haynayo keliya inta laga gaarayo ujeeddooyinkaas, marka laga reebo:
d. in heyntiisa xogta uu u baahan yahay ama uu sharcigu u oggolaaday; ama
e. in dadka xogta leh ay oggolaadeen sii-haynta iyo keydinta xogtooda
f. Mid sax ah, dhammaystiran, aan wax Marin-habaabineyn iyo, haddii loo baahdo, la cusbooneysiin karo.

## Qodobka 16aad: Caruurta Iyo Dadka Kale Ee Aan Lahayn Awood Sharci

1. Marka qofka xogta leh uu yahay ilmo ama shakhsi aan si kale u lahayn awood sharci, oggolaansho kasta oo loo baahan yahay waa in laga helaa waalidkiisa ama qofka kale ee wakiilka sharci u ah.
2. Xog-dhowraha xogta waxa uu qaadan karaa ogolaanshaha uu bixiyo ilmo gaaray da'da qaangaarka si waafaqsan qodobka 14(2) (a), marka ay ku saleysan tahay bixinta macluumaad ama adeeg qaab elektaroonig ah oo ku dhisan codsiga gaarka ah ee qaataha.
3. Hayu'addu waxa ay xeer-hoosaadka ku sheegi kartaaa in faqradda 2-aad ee qodobkan lagu dabaqi karo ilmo da'da qaangaarka ka yar.
4. Xog-dhowraha xogta waa inuu sameeyaa tallaabooyinka ku habboon si uu u xaqiijiyo aqoonsiga iyo da'da qofka xogta leh iyo wakiilkiisa, xiriirka uu la leeyahay qofka xogta leh iyo oggolaanshaha.
5. Marka la dabaqayo faqradda 4-aad, dukumentiyada aqoonsi ee dowladdu ansixisay ayaa ah habka ku habboon.
6. Faqradda 1-aad ee qodobkan lama dabaqayo marka:
    a. adeegsiga xogta uu lagama maarmaan u yahay ilaalinta danaha muhiimka ah ee ilmaha ama qofka kale aan laheyn awoodda sharci ee oggolaanshaha;
    b. adeegsiga xogta lagu fulinayo ujeeddooyin waxbarasho, caafimaad ama daryeel bulsho taas oo hoos imaaneysa masuuliyadda xirfadle ama adeeg bixiye ay saaran tahay waajib xog-dhowris ah; ama
    c. Adeegsiga xogta uu muhiim u yahay dacwad maxkamad hor taalla oo khuseysa ilmaha ama qofka kale aan laheyn awoodda sharci.

## Qodobka 17aad: Saamaynta Oggolaanshaha Qofka Xogta Laga Qaaday

Xog-dhowraha xogta waxaa saaran culeyska caddeynta in uu sameeyay oggolaanshaha qofka marka adeegsiga xogta ay u baahan tahay oggolaansho si waafaqsan Sharcigan.

## Qodobka 18aad: Siinta Macluumaad Qofka Xogta Leh

1. Maamulaha xogta waa inuu hubiyaa in qofka xogta leh lagu wargeliyay kahor inta aan xogta laga qaadin arrimahan:
    a. aqoonsiga, iyo siyaabaha uu kula soo xiriiri karo Xog-dhowraha Xogta;
    b. ujeeddada xogtiisa loo adeegsanayo si waafaqsan qodobka 14(2)
    c. aqoonsiga hay'ad kasta ama qof kasta oo xogta shakhsiga ah lala wadaagi doono;
    d. xuquuqda uu leeyahay ee ku xusan cutubka 4aad iyo xaqiisa inuu cabasho u gudbin karo Hay'adda si waafaqsan qodobka 31-aad; iyo
    e. Faafaahinta aaladaha go'aan-qaadasho ee xogta lagu farsameeyo, sida aaladaha loo adeegsado qofeynta (profiling), ujeedka loo isticmaalayo iyo cawaaqibka suurtagalka ah ee kasoo gaari karta isticmaalka aaladahan.
2. Haddii macluumaadka lagu sheegay faqradda 1-aad aan markii hore la siin qofka xogta leh, xog-dhowraha waa inuu sida ugu dhakhsaha badan ku siiyaa waqtiga ugu dhow.
3. Faqradda 1-aad iyo 2-aad ee qodobkan lama dabaqayo haddii in loo hoggaansamo aysan suurtaggal aheyn, ama ay u baahan tahay dadaal ama kharash aan u dhigmin.

## Qodobka 19aad: Mas'uuliyadda Degsashada Xogta Shakhsiga

1. Maamulaha xogta waa inuu diiwaan geliyaa dhammaan xog-degsadayaasha isticmaala xogta shakhsiga ah ee uu hayo, ayna ku jiraan xog degsadayaasha hoos taga kuwa kale.
2. Xog-dhowraha xogta waa inuu qaadaa tillaabooyin macquul ah uu ku hubinayo in xog-adeegsadaha u isticmaalayo xogta waxa ka khuseeya xog-dhowraha:

a. inuu ku sameeyo degsigsa xogta shakhsiga ah hab waafaqsan Sharcigan;
b. inuu bixinayo dhammaan ogeysiisyada, macluumaadka iyo arrimaha looga baahan yahay si xog-dhowraha ugu hoggaansamo qodobbada Sharcigan;
c. inuu xog degsadaha buuxiyo shuruudaha ku xusan qodobka 24-aad; iyo
d. Inuu xafido diiwaanka si degdeg ahna ku ogeysiiyaa xog-dhowraha haddii la jabsado xogta shakhsiga ah, oo ay ku jiraan xaqiiqooyinka la xiriira jabsashada, saameynteeda iyo tallaaboonka la qaaday si loo xalliyo.

3. Tallaabooyinka ku xusan faqradda 2-aad ee qodobkan waxaa kamid ah in heshiis qoraal ah wada galaan xog-dhowraha xogta iyo xog degsadaha, iyo inuu xog degsadaha heshiis sidaan oo kale ah la galo cidkasta oo kale oo ku lug yeelaneysa isticmaalka xogta.
4. Dhammaan tixraacyada sharcigan ee ku saabsan degsiga xogta shakhsiga ah waxa ay ku waajibinayaan xog-dhowraha xogta inuu u hoggaansamo nidaamka degsiga xogta ee Sharcigan.

## CUTUBKA 4AAD: XUQUUQDA QOFKA XOGTA LEH

### Qodobka 20aad: Xuquuqda Xaqiijinta, Gelitaanka, Sixidda Iyo Tirtiridda

1. Iyada oo la ilaalinayo faqradda 2-aad ee qodobkan, qofka xogta leh waxa uu xaq u leeyahay inuu xog-dhowraha xogta ka helo asbaabta loo adeegsanayo xogtiisa, iyo inuu si bilaash ah oo aan dib udhac laheyn ku helo:
    a. xaqiijinta in xogtiisa gaarka ah la isticmaalayo iyo in kale, iyo isha xogta;
    b. Nuqul kamid ah xogtiisa gaarka ah oo lagu siinayo qaab elektaroonik ah;
    c. sixidda, ama haddii sixitaanku suurtagal ahayn ama ku habbooneyn, in laga tirtiro xogta qaldan, taariikhdeedu dhaaftay, aan dhamaystirnayn ama marin-habaabinta ah; iyo
    d. Tirtiridda xog kasta oo shakhsi ah uu xog-dhowraha xogta xaq u lahayn inuu sii hayo.
2. Marka la dajinayo khidmadda ku xusan faqradda 2-aad, waxaa la tixgalinayaa kharashaadka maamul ee bixinta macluumaadka ama gaarsiinta ama qiimaha ay ku kaceyso qaadista tallaabada la codsaday.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA · THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC

3. Haddii xuquuqda qofka xogta leh ee ku xusan faqradda 1-aad ay tahay mid aan sal laheyn ama xad dhaaf ah, gaar ahaan haddii ay tahay mid soo noqnoqoneysa, xog-dhowraha xogta wuxuu ku dalaci karaa qofka xogta leh khidmad macquul ah ama wuu diidi karaa codsigaas;

## Qodobka 21aad: Xaqa Ka Noqoshada Ogolaanshaha

1. Qofka xogta leh waxa uu xaq u leeyahay inuu ka noqdo ogolaanshihiisa adeegsiga xogta ee uu hore u bixiyay.
2. Maamulaha xogta waa inuu xaqiijiyaa in qofka xogta leh uu si fudud ugu noqon karo oggolaanshihiisa, uuna ku wargeliyo natiijada ka dhalaneysa arrintaas.

## Qodobka 22aad: Xaqa Diidmada

1. Qofka xogta leh waxa uu xaq u leeyahay inuu diido:
    a. adeegsiga xogtiisa gaarka ah ee ku saleysan qodobka 14(2)(i), (j) ama (l) haddii adeegsigaas ay kasoo gaareyso dhibaato ama waxyeello aan damaanad laheyn;
    b. Sida ku xusan qodobka 23-aad, inuusan masuul ka aheyn go'aannada ku saleysan aaladaha xogta farsameeya, sida qofeynta.
2. Haddii qofka xogta leh si sharci ah udiido adeegsiga xogtiisa si waafaqsan faqradda 1-aad, xog-dhowraha waa inuu joojiyaaa isticmaalka xogtaas, illaa ay jirto dan guud ama sababo kale oo sharci ah oo ka miisaan culus dhibaatada iyo waxyeellada shakhsi ahaantiisa soo gaareysa.

## Qodobka 23aad: Xaqa in Uusan Masuul Ka Aheyn Go'aan Ku Saleysan Keliya Aaladaha Xogta Farsameeya

Qofka xogta leh waxa uu xaq u leeyahay inusan masuul ka aheyn go'aan ku saleysan keliya aaladaha xogta farsameeya, sida qofeynta, taas oo ay ka dhalaneysa saameyn sharci oo khuseysa isaga, marka laga reebo in go'aanadaas:

1. lagama maarmaan u yihiin gelidda ama fulinta heshiis u dhexeeya qofka xogta leh iyo maamulaha xogta;
2. lagu oggolaaday sharci qoran oo u yeelaya tallaabooyin ku habboon si loo ilaaliyo xuquuqda aasaasiga ah iyo danaha qofka xogta leh; ama
3. Qofka xogta leh ku aqbalay oggolaanshihiisa.

## CUTUBKA 5AAD: AMNIGA XOGTA IYO QIIMAYNTA SAAMAYNTA XOGTA

### Qodobka 24aad: Amniga, Hufnaanta, Iyo Sir-Ahaanshaha Xogta Shakhsiga Ah

1. Xog-dhowraha xogta waa inuu hirgeliyaa tillaabooyinka farsamo iyo nidaamyada ku habboon in lagu xaqiijiyo amniga, hufnaanta iyo sir ahaanshaha xogta gaarka ah ee uu hayo ama maamulo, ayna kamid tahay inuu xogta ka ilaaliyo burbur shileed ama mid sharcidarro ah, ama inay lunto, si xun loo isticmaalo, la baddalo, lala wadaago ama ay gasho cid aan loo oggoleyn.
2. Marka la fulinayo tallaabooyinka ku xusan faqradda 1-aad, xog-dhowruhu waa inuu ku xisaabtamaa:
    a. heerka ay la egtahay iyo xasaasinimada xogta shakhsiyeed;
    b. dabeecadda iyo heerka ay gaarsiisan tahay waxyeellada soo gaari karta dadka xogta leh haddii ay lunto, shaaca laga qaado ama si qaldan loo isticmaalo xogtooda;
    c. inta ay le'eg tahay adeegsiga;
    d. muddada haynta xogta; iyo
    e. Helitaanka iyo kharashka ku baxaya teknoolajiyada, agabka ama nidaamyada kale ee la hirgelinayo.
3. Nidaamyada aan lagu fulin sida ku xusan faqradda 1-aad waxa kamid ah:
    a. isticmaalka nidaamka 'pseudonymization' iyo hababka aqoonsi-daboolka (de-identification) ee xogta shakhsiga ah;
    b. hababka rogaal-akhriska xogta shakhsiga ah (encryption methods);
    c. hababka lagu xaqiijinayo amniga, nabad gelyada, sir ahaanshaha, helidda iyo adkeysiga nidaamyada iyo adeegyada;

d. hababka lagu soo celiyo helitaanka iyo isticmaalka xogta shakhsiga ee waqtiga ku saleysan haddii uu dhaco shil muuqda ama mid farsamo;

e. qiimayn xilliyeed lagu sameeyo khataraha ku iman kara nidaamyada adeegsiga xogta, adeegyada iyo shabakadaha isgaarsiinta elektiroonigga ah;

f. tijaabooyin joogto ah, qiimaynta iyo qiyaasidda waxtarka tillaabooyinka la hirgaliyay ee lidka ku ah khataraha hadda jira iyo kuwa imaan doona ee macquulka ah;

g. Cusboonaysiinta joogtada ah ee nidaamyada iyo soo bandhigida kuwa cusub oo wax looga qabanayo cilladaha iyo gaabisyada jira loona daboolo khataraha soo darsi Kara.

## Qodobka 25aad: Ogeysiisyada Jabsashada Xogta

1. Marka ay dhacdo in la jabsado ama lagu xadgudbo xogta shakhsiga ah, ayna u badan tahay inay ka dhalato khatar ku imaaneysa xuquuqda iyo xorriyaadka dadka, xog-dhowruhu waa inuu hay'adda ogeysiiyo jabsashada toddobaatan iyo laba saac gudahood, kaddib markii uu ogaaday;
2. Xog-dhowraha xogta waxa uu kororsan karaa muddada 72-ka saac ah ee ku xusan faqrada sare, si uu u daboolo baahiyaha sharciga ah ee ka dhalan Kara arrintaan ama si uu uqaado tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si uu ogaado baaxadda jabsashada.
3. Haddii Xog-dhowraha xogtu uu kororsado muddada si waafaqsan faqradda 2-aad, waxa uu ku wargalinayaa Hay'adda sababaha uu ukororsaday, oo ay la socoto cadaymo xoojinaya, inta lagu guda jiro muddada 72-ka saac ee ku xusan faqradda 1-aad;
4. Iyadoo la raacayo faqradda 5-aad, marka jabsashada xogta shakhiga ah ay u badan tahay inay keento khatar weyn oo ku wajahan xuquuqda iyo xoriyaadka dadka xogta leh, xog-maamuluhu waa inuu sidoo kale ogeysiiyaa shakhsi kasta oo ay saameysay si aan daah ku jirin laguna sheegayo luqad cad.
5. Haddii la-xiriirka tooska ah ee dadka xogta leh ee lagu tilmaamay faqradda 4-aad ay ku kaceyso dadaal xoog leh iyo qarash adag oo aan la qiyaasi karin, amaba aysan suurtagal aheyn, xog-maamulaha waxa uu farriinta u marsiin karaa dadka xogta leh mid kamid ah ilaha warbaahineed ee sida ballaaran loo isticmaalo

6. Marka la qiimaynayo halista ku wajahan xuquuqda iyo xorriyaadka dadka xogta leh sida ku xusan faqradda 4-aad, xog-dhowraha Xogta waa inuu xisaabta ku darsadaa:
    a. Waxtarka ay leedahay tallaabo kasta oo farsamo ama maamul ee la qaado si loo yareeyo waxyeelada suurtagalka ah ee ka dhalan karta jabshashada xogta;
    b. Sameynta tallaabo kasta oo gacan ka geesaneysa dhimista khasaaraha; iyo
    c. Dabeecadda, baaxadda iyo xasaasinimada xogta shakhsiyeed iyo nuglaanta dadka xogta leh.
7. Hay'addu waxay waqti kasta samayn kartaa wargelin dadweyne oo ku aaddan xogta shakhsiga ah ee la jabsaday, haddii ay u aragto in aanay ku filnayn ogeysiiska uu xog-dhowraha siiyay dadka xogta leh si waafaqsan faqradda 4-aad.

## Qodobka 26aad: Nuxurka Ogeysiisyada Jabsashada Xogta Iyo Wargelinta

1. Ogeysiisyada jabsashada xogta shakhsiga ah iyo wargelinta loogu baahan yahay inuu sameeyo xog-maamulaha sida ku xusan Qodobka 25-aad waa sidan:
    a. in la tilmaamo dabiicadda xogta gaarka ah ee la jabsaday, iyo, haddii ay suurtagal tahay, qaybaha iyo qiyaasta tirada dadka ay xogtooda shakhsi ahaanceed khusayso;
    b. in la sheego magaca iyo faafaahinta halka lagala soo xiriiri karo xog-dhowraha oo macluumaad dheeraad ah laga heli karo;
    c. in la xuso natiijada suurtaggal ah ee ay u badan tahay inay ka dhalato jabsashada taas oo gaareysa dadka xogta leh;
    d. In sharraxaad laga bixiyo tallaabooyinka uu qaaday ama uu qaadi doono xog-dhowraha si uu wax uga qabto jabsashada xogta, taas oo ay ku jirto tallaabo kasta oo lagu dhimayo saameynteeda xun.
    e. Marka ogeysiiska la siinayo dadka xogta leh ama lagu sheegayo wargelin dadweyne, waa in la raaciyaa talooyinka iyo tallaabooyinka ay tahay inay sameeyaan dadka xogtooda la jabsaday si ay u yareeyaan waxyeellada macquulka ah ee soo gaari karta.
2. Haddii aanay suurtogal ahayn in la bixiyo macluumaadka ku xusan qodobkan halmar, xogta waxaa lagu bixin karaa heerar iyada oo aan dib loo dhigin.

## Qodobka 27aad: Diiwaangelinta Jabsashada Xogta

Xog-dhowre kasta waa inuu diiwaan geliyaa dhammaan xogta shakhsiga ah ee laga jabsaday nidaamyadiisa, iyo sidoo kale xaqiiqooyinka la xiriira jabsashada xogtaas, saameynteeda iyo tallaabooyinka magdhow ee la qaaday qaab u saamaxeysa Hay'adda inay hubiso u hoggaansamidda Cutubkan.

## Qodobka 28aad: Hagidda Hay'adda

Hay'addu waxa ay soo saareysaa hagid ku saabsan tillaabooyinka ay qaadayaan xog-dhowrayaasha si ay ugu hoggaansamaan ogaysiisyada jabsashada xogta iyo waajibaadka wargelin ee ku xusan Cutubkan.

## Qodobka 29aad: Qiimaynta Saamaynta Ilaalinta Xogta

1. Marka adeegsiga xogta ee xog-dhowraha xogta ee muhiimka ah ay u badan tahay inay keento khatar sare oo ku wajahan xuquuqda iyo xorriyaadka dadka xogta leh dabiicad ahaan, baaxad ahaan, siyaaqeeda guud iyo ujeedooyinka loo isticmaalayo, maamulaha xogta ee muhiimka ah waa:
    a. inuu sameeyo Qiimaynta Saamaynta Ilaalinta Xogta kahor inta uusan adeegsan; iyo
    b. Inuu Hay'adda usoo gudbiyo warbixinta qiimaynta saamaynta xogta.
2. Xog-dhowraha xogta ee muhiimka ah waa inuu kala tashadaa Hay'adda inta uusan isticmaalin xogta, iyada oo aan loo eegin tillaabooyinka ku xusan faqradda 4(d), haddii ay qiimeynta keenayso khatar sare oo ka dhan ah xuquuqda ah iyo xorriyaadka dadka xogta leh.
3. Hay'addu waa inay soo saartaa hab-raacyo ku saabsan:
    a. sida loo sameynayo Samaynta Qiimaynta Xogta; iyo

b. Qaababka adeegsiga ee lagu sameynayo qiimaynta saamaynta xogta si waafaqsan faqradda 1-aad.

4. Ujeedooyinka qodobkan, "qiimaynta saamaynta ilaalinta xogta" waa qiimayn lagu ogaanayo saamaynta uu ku yeelan adeegsiga la qorsheeyay dhowrista xogta shakhsi ahaaneed waxa ayna ka kooban tahay:

   a. sharaxaad nidaamsan oo laga bixiyo adeegsiga la qorsheeyay iyo ujeedkiisa, oo ay ku jirto caddeynta danta sharciga waafaqsan ee loogu gol leeyahay adeegsiga;
   b. siimaynta baahida iyo saamiga adeegsiga ee la xiriira ujeedooyinka xogta shakhsiga ah loo isticmaali doono;
   c. qiimaynta khataraha ku wajahan xuquuqda iyo xorriyaadka dadka xogta leh; iyo
   d. Tallaabooyinka loo diyaariyay in wax looga qabto haddii khatarahaas dhacaan iyo tallaabooyinka amni iyo hababka lagu sugayo ilaalinta xogta shakhsiga ah iyo in la muujiyo ka go'anaanshaha u hoggaansamidda Sharcigan.

5. Wasiirku waxa uu sameyn karaa xeerar maamul uu kaga reebayo qeybo kamid ah xog-dhowrayaasha muhiimka ah qaar kamid ah ama dhammaan waajibaadka Qodobkan ku xusan.

6. Marka la go'aaminayo wixii ka-reebid ah sida ku cad faqradda 5-aad, Hay'addu waa inay tixgelisaa:

7. culayska iyo saamiga diyaarinta qiimaynta saamaynta ilaalinta xogta;

   a. Suurtagalnimada iyo culayska khataraha ku imaan kara xuquuqda iyo xorriyaadka dadka xogta leh; iyo
   b. Hababka kale ee lagu qiimeyn karo lagunа yareyn karo khatarahaas.

## CUTUBKA 6AAD: GUDBINTA XUDUUDDA EE XOGTA SHAKHSIGA AH

### Qodobka 30aad: Heerka Ilaalin Eek U Habboon Gudbinta Xuduudaha Ee Xogta Shakhsiga Ah

1. Xog-dhowraha xogta uma wareejin karo xogta shakhsiyeed dal ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama hay'ad caalami ah illaa la buuxiyo mid kamid ah shuruudahan:

a. xogta shakhsiga ah waxaa helaya keliya dal ama dalal, gobolo ama qeyb cayiman oo kamid ah dal gaar ah kaas xogta siiya ilaalin ku habboon;
b. xog-qaataha waa hay'ad ama urur caalami ah oo siyaasadiisa iyo tallaabooyinkiisa maamul iyo farsamo ay xogta siinayaan ilaalin ku habboon;
c. xog-qaataha waxa uu u hoggaansamaa xeerar shirkadeed oo waajib ah, qodobbo heshiis, xeerar anshax, habka caddeynta ama halbeegyo kale oo xogta siinaya ilaalin ku habboon; ama
d. Xog-qaataha waxaa ku dabaqmaya mid kamid ah asbaabta sharci ee ku xusan qodobka 31-aad.

2. Waxaa lagu qiimeynayaa ku habboonaanta heerka ilaalinta xogta ee ku xusan faqradda 1-aad iyadoo la tixgelinayo:
   a. in qaabka ilaalintu ay ku saleysan tahay mabaadi' si weyn ula mid ah shuruudaha adeegsiga xogta shakhsiyeed ee lagu sheegay Sharcigan, ayna kamid tahay mabaadi'da la xiriirta gudbinta xogta shakhsiga ah meel ka baxsan ikhtisaaska qaataha;
   b. inay jirto ixtiraamka xuquuqaha dadka xogta leh, iyo awoodda dadka xogta leh ay u leeyihiin inay fuliyaan xuquuqdooda iyaga oo u maraya habraac maamul ama garsoor, iyo sarreynta sharciga guud ahaan;
   c. Jiritaanka heshiis ama dukuminti qoraal ah oo udhaxeeya Hay'adda iyo hay'adda dowladeed ee dhiggeeda ah ee ka jirta dalka xog-qaataha taas oo ku saabsan ilaalinta xogta;
   d. isticmaalka xogta shakhsiga ah ee hay'ad dowladeed shisheeye;
   e. jiritaanka Sharci Xog-dhowris oo wax ku ool ah kaas oo dhaqangal ka ah dalka uu ku sugan yahay xog-qaataha helaya xogta shakhsiyeed;
   f. Jiritaanka iyo inay shaqeeneyso hay'ad madax-bannaan oo karti uleh ilaalinta xogta, ama hay'ado kale oo kormeer oo lamid ah kuwaas oo leh awoodo fulin dalka xog-qaataha;
   g. Heshiisyo caalami ah oo khuseeya xog dhowrista kuwaas uu saxiixe ka yahay dalka xog-qaataha iyo inuu ku jiro ururro caalami ah ama urur goboleedyo ilaaliya xogta.

3. Xog-dhowraha xogta waa inuu diiwaan geliyaa shardiga ku xusan faqradda 1-aad ee loo cuskaday in loogu oggolaado u gudbinta xogta shakhsiyeed dal ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama urur caalami ah, iyo sidoo kale qiimayn kasta oo lagu sameeyay si waafaqsan faqradda 2-aad;
4. Hay'addu waxay:
   a. soo saari kartaa xeerar iyo hagitaanno la xiriira qiimaynta ku habboonaanta ilaalinta xogta iyo arrimaha ku xusan faqradda 1-aad iyo 2-aad ee Qodobkan
   b. go'aamin kartaa in urur ama hay'ad caalami ah, dal, gobol ama qeyb cayiman oo dal kamid ah iyo sidoo kale in sharci, xeerar shirkadeed oo waajib ah, qodobo heshiis, xeerar anshax, habka caddeynta ama halbeeg kale uu bixinayo ama uusan bixineyn illaalin ku habboon si waafaqsan faqradda 1-aad;
   c. hagid iyo talooyin ka siin kartaa xog-dhowruhu illaa heerka ilaalin ee la bixiyay si uu u wareejiyo xogta shakhsi ahaaneed sida ku xusan faqradda 1-aad; iyo
   d. ka dalban kartaa xog-dhowre kasta inuu soo ogeysiiyo Hay'adda shuruudaha uu u cuskaday gudbinta xogta shakhsiyeed sida lagu tilmaamay faqradda 1-aad;
   e. Haddii ay hay'addu samayso ama aysan sameynin wax xeer ah ama hagitaan ah ama go'aan ah si waafaqsan faqradda 4(a) ama (b), taasi ma saamaynayso inuu xog-dhowraha u hoggaansamo faqradda 1-aad;

## Qodobka 31aad: Ka Gudbinta Xudduudaha Marka Aysan Jirin Ilaalin Ku Habboon

1. Haddii aan midna la helin shuruudaha ku xusan qodobka 30(1)(a), (b) ama (c), wali xog-dhowraha waxa uu u wareejin karaa xogta shakhsiga ah dal ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama urur caalami ah haddii:
   a. qofka xogta leh bixiyay oggolaanshihiisa uusana dib uga noqon, kadib markii lagu wargeliyay cawaaqibka suurtagalka ah ee ka dhalan karta wareejintaas sabab la xiriirta in aanay jirin ilaalin ku filan;

b. adeegsigu uu lagama maarmaan u yahay gelidda ama fulinta heshiis dan u ah qofka xogta leh;
c. wareejintu waxay lagama maarmaan u tahay gelidda ama fulinta heshiis dan u ah qofka xogta leh, oo u dhaxeeya maamulaha xogta iyo dhinac saddexaad; ama
d. wareejintu waxay faa'iido ugu jirtaa qofka xogta leh, haddana:
    i. suurtagal ma ahan in la helo ogolaanshaha qofka xogta leh; iyo
    ii. Haddii qofka xogta leh la weydiin lahaa oggolaanshihiisa siday u badan tahay wuu bixin lahaa.

2. Haddii u gudbinta xogta shaqsiga dal ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama hay'ad caalami ah lagu saleyn karin qodobbada 30-aad ama 31(1), wareejintu waxay dhici kartaa oo keliya haddii:
    a. wareejintu aysan soo noq-noqoneyn;
    b. Wareejintu waxay khusaysaa keliya tiro kooban oo dadka xogta leh ah;
    c. Wareejintu waxay lagama maarmaan u tahay ujeedooyin muhiim ah, sharcigana waafaqsan oo dan u ah xog-dhowraha sidoo kalena aan ku xad-gudbeyn danaha ama xuquuqda iyo xorriyaadka qofka xogta leh; iyo
    d. Xog-dhowraha xogta waxa uu qiimeyn ku sameeyay dhammaan duruufaha ku xeeran wareejinta, waxa uuna ogaaday in la helayo ilaalin ku filan illaa heer dhowrista xogta.
3. Haddii wareejinta lagu sameeyo faqradda 2-aad, maamulaha xogta waa inuu:
    a. ku wargeliyaa wareejinta Hay'adda; iyo
    b. Ku wargeliyaa wareejinta dadka xogta leh si waafaqsan qodobka 18-aad, una sheegaaya danaha muhiimka ah ee uu u cuskaday.

## CUTUBKA 7AAD: DIIWAANGELINTA IYO KHIDMADAHA

### Qodobka 32aad: Diiwaangelinta Maamulayaasha Xogta Ee Muhiimka Ah

1. Dhammaan xog-dhowrayaasha muhiimka ah waa inay iska diiwaan geliyaan Hay'adda muddo lix bilood gudahood, kaddib markii ay buuxiyaan shuruudaha xog-maamulayaasha muhiimka ah ee ku xusan Sharcigan.

2. Marka la sameynayo diiwaangelinta ku xusan faqradda sare, waa in xog-dhowraha muhiimka ah uu Hay'adda ogeysiiyaa:
    a. magaciisa iyo cinwaankiisa, iyo sidoo kale magaca iyo macluumaadka xiriirka ee masuulkiisa ilaalinta xogta (Sarkaalka Xog-dhowrista)
    b. sharraxaad ku saabsan xogta shakhsiga ah ee ka dhigeysa xog-dhowre muhiim ah;
    c. qaybaha iyo tirada guud ay yihiin dadka xogta shakhsiyeed la xiriirto;
    d. ujeedooyinka uu ka leeyahay xogta shakhsiga ah ama uu u adeegsado;
    e. qaybaha xog-qaatayaasha uu la wadaago ama la wadaagayo xogta shakhsiga ah;
    f. Hay'ad kasta oo caalami ah ama dal kasta oo ka baxsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu xogta shakhsiga ah u gudbiyay ama uu doonayo inuu u gudbiyo;
    g. Sharaxaad guud oo ku aaddan khataraha, ilaalinnada iyo tallaabooyinka amniga iyo hababka uu ku xaqiijiyo dhowrista xogta shakhsiga ah; iyo
    h. Macluumaad kasta oo kale oo ay uga baahan tahay Hay'adda.
3. Xog-dhowraha xogta ee muhiimka ah waa inuu cusbooneysiiyaa diiwaangelintiisa sannad kasta.
4. Hay'addu waxa ay u tixgelinaysaa kuna daabaceysaa mareegaheeda Internet-ka liiska xog-dhowrayaasha Xogta ee muhiimka ah ee sida saxda ah ugu diiwaangashan, si waafaqsan Qodobkan.
5. Maareeyaha Hay'adda waxa uu xeer-hoosaadka kaga reebi karaa qayb kamid ah maamulayaasha xogta ee muhiimka ah shardiga diiwaangelinta ee ku xusan qodobkan, haddii uu u arko inaan loo baahneyn ama ay ka miisaan culus yihiin tixgelinta danta guud.
6. Maamulaha Xogta ee muhiimka ah looma qaadan karo inuu yahay 'xog-dhowre muhiim ah' oo loogu baahan yahay inuu fuliyo ujeeddooyinka faqradda 1-aad illaa laga gaaro taariikhda Sharcigan uu dhaqan galayo.

## Qodobka 33aad: Khidmadaha Iyo Canshuuraha

1. Maareeyaha waxa uu xeer-hoosaadka ku sheegi karaa khidmadaha sannadlaha ah ama canshuuraha ay bixinayaan xog-dhowrayaasha muhiimka ah si ay udaboolaan kharashaadka Hay'adda ee ku xusan Sharcigan.

2. Heerarka khidmadaha iyo canshuuruhu way kala duwanaan karaan iyadoo loo eegayo nooca ama cabbirka xog-dhowrayaasha muhiimka ah.
3. Xukuumadda, hay'adaha dowladda iyo hay'ad kasta oo kale oo ay xukuumaddu magacowdo si ay u qabato hawlo guud, laguma qaadi karo khidmadaha iyo canshuuraha sanadlaha ah ee ku xusan faqradda 1-aad.

### Qodobka 34aad: Magacaabidda Saraakiisha Xog Dhowrista

1. Maamulaha xogta ee muhiimka ah waa inuu magacaabaa Sarkaalka Xog-dhowrista' kaas oo aqoon iyo khibrad u leh Sharciga Xog Dhowrista, iyo sidoo kale habka iyo kartida loo fuliyo hawlaha ku xusan faqradda 3-aad.
2. Sarkaalka xog dhowrista waxa uu noqon karaa shaqaale ama uu qandaraasle adeeg.
3. Sarkaalka xog dhowrista xogta waxa uu leeyahay hawlaha soo socda:
    a. inuu kala taliyo xog-dhowraha waajibaadkiisa ka saaran Sharcigan;
    b. Inuu kormeero u hoggaansanaanta maamulaha xogta ee Sharcigan iyo siyaasadihiisa ilaalinta xogta.
    c. Inuu noqdo bar-xiriirka Hay'adda ee arrimaha la xiriira adeegsiga xogta shakhiga ah ee Xog-dhowraha.

## CUTUBKA 8AAD: FULINTA

### Qodobka 35aad: Cabashooyinka

1. Qofka xogta leh ee waxyeello kasoo gaartay falka ama fal la'aanta maamulaha xogta, kana dhalatay xadgudub ka dhan ah Sharcigan ama xeerar maamul ama xeer-hoosaadyo ama amarro dhaqangal ah waxa uu cabasho u gudbisan karaa Hay'adda.
2. Hay'addu waa inay qabataa cabasho kasta oo loo soo gudbiyo marka ay ula muuqato:
    a. In cabtuhu uu dan ku leeyahay mowduuca ay cabashadu la xiriirto; iyo
    b. In cabashadu aysan aheyn mid dhayal ah ama collaadeysi ku saleysan.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA THE UPPER HOUSE

JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC HOUSE OF THE PEOPLE

3. Hay'addu waxay sameeneysaa qeyb ama waax qabata oo la macaamisha cabashooyinka ay keenaan dadka xogta leh, sidoo kalena baaris ku sameysa.

## Qodobka 36aad: Baaritaannada

1. Hay'addu waxay billaabi kartaa baaris ku saabsan cabashada loo soo gudbiyay ama si iskeeda ah marka ay jirto asbaab macquul ah oo tilmaameysa in xog-dhowraha uu ku xadgudbay ama ay u badan tahay inuu ku xadgudbo Sharcigan, ama xeer-maamul, ama xeer-hoosaad ama amarro lagu soo saaray sharcigan.
2. Hay'addu waxay ku amri kartaa qof kasta, ujeeddooyin baariseed darteed –
   a. inuu yimaado meel gaar ah waqti cayiman si wax loogu weydiiyo arrin ku saabsan cabasho;
   b. inuu keeno dukumintiga, diiwaanka ama qoraalka loogu baahan karo arrin kasta oo baarista la xiriirta, kaas oo aan qofku ka hor istaageyn sharci kale inuu shaaciyo; ama
   c. Inuu keeno bayaan qoraal ah oo uu ku sameeyay dhaar ama xaqiijin tibaaxeysa dhammaan macluumaadka loo baahan karo si waafaqsan amarka.
3. Marka sheyga baaristu la xiriirto ay ku jirto macluumaad lagu keydiyay qalab makaanik ama elegtaroonig ah, Hay'addu waxay ka dalban kartaa qofka inuu soo saaro ama oggolaado in la galo qalabkaas qaab la arki karo oo u habeysan, luqad la fahmi karo iyo format la akhrin karo.

## Qodobka 37aad: Ammaradda Hay'adda

1. Haddii ay Hay'adda ku qanacdo, kadib marka ay soo gabagabeyso baarista si waafaqsan qodobka 36-aad, in xog-maamulaha uu jabiyay qodob kamid ah Sharcigan, xeer maamul, xeer-hoosaad ama xeer kale oo lagu soo saaray Sharcigan, waxa ay samayn kartaa amar kasta oo ku habboon, kaas oo xog-maamulaha ku farayso:
   a. inuu ka joogsado ama ka leexdo sameynta fal ka hor-imaanaya Sharcigan, oo ay kamid tahay inuu ka joogsado adeegsiga mowduuca Amarka;
   b. inuu qaado tallaabo macquul ah uu uga joojinayo xog-adeegsade isticmaalka xogta, si loo hubiyo u hoggaansanaanta sharcigan;

c. inuu magdhow ka bixiyo uuna saxo xadgudubka;
d. inuu magdhow siiyo qofka xogta leh ee ay gaartay dhibaatada, khasaaraha ama dhaawaca ka dhashay xadgudubka;
e. inuu dib u celiyo faa'iidada uu ka sameeyay falka xadgudubka; ama
f. Inuu bixiyo ganaax maamul oo gaaraya illaa [hal milyan oo dollar] ama qiimo u dhigma oo lacagta Soomaaliga ah.

2. Amar kasta oo ay soo saarto Hay'addu si waafaqsan faqradda 1-aad waa inuu noqdaa mid ku habboon, oo tixgelinaya:
    a. culayska xadgudubka iyo dabiicaddiisa soo noqnoqasho;
    b. dadaalka uu ku bixiyay xog-maamulaha inuu u hoggaansamo, uuna macluumaad siiyo Hay'adda iyo dadka xogta leh; iyo
    c. Waxyeelada iyo khatarta gaartay xuquuqda iyo xorriyadaha dadka xogta leh.

### Qodobka 38aad: U Hogaansamid La'aanta Amarka Hay'adda

1. Maamulaha xogta ee aan u hoggaansamin amarka Hay'adda ee lagu sameeyay si waafaqsan qodobka 37-aad ee Sharcigan, aana aheyn racfaan uu ka qaatay sida ku cad qodobka 39-aad, waxa uu galayaa fal-dambiyeed uu ku muteysan karo ganaax illaa [hal milyan oo dollar] ah ama qiimo udhigma lacagta Soomaaliga iyo xarig [laba] sano ah.
2. Masuuliyada ganaaxa ee ku xusan faqradda 1-aad ma baajineyso ama hoos uma dhigeyso masuuliyad kasta oo kale oo ka dhalaneysay amarka lagu sameeyay si waafaqsan qodobka 37-aad.

### Qodobka 39aad: Racfaan Ka Qaadashada Amarka Hay'adda

Waxaa u bannaan qofka xogta leh, maamulaha xogta ama qofka kale ee danta ku leh mowduuca cabashada ee aan ku qancin go'aanka Hay'adda, inuu u gudbisto Maxkamadda Sare dib-u-eegis garsoor muddo soddon [30] maalmood gudahood, kadib marka amarka lasoo saaray.

### Qodobka 40aad: Magdhow Madani ah

Qofka xogta leh ee waxyeellada, dhibaatada ama khasaaraha kasoo gaartay xog-dhowraha ku xad-gudbay Sharcigan, ama Shirkadda Macaamiil ee wakiilka ka qof ama dad badan oo xog leh, waxa ay dacwad madani ah ka furan karaan maxkamadda ikhtisaaska uleh si ay u dalbadaan magdhow madani ah.

## CUTUBKA 9AAD: QODOBBO QUBANE AH

### Qodobka 41aad: Awoodda Soo Saarista Xeer-Hoosaad

1. Hay'adu waxay awood u leedahay inay soo saarto xeer-hoosaad lagu faafinayo Faafinta Rasmiga ah kaas oo sharaxaad ka bixinaya qodobada Sharcigan.
2. Iyadoo waxba loo dhimayn faqradda 1-aad, xeer-hoosaadku waxa uu dhigi karaa:
   a. Maamulka maaliyadeed ee arrimaha Hay'adda;
   b. ilaalinta xogta shakhsiga ah iyo dadka xogta leh;
   c. Habka ay Hay'addu u isticmaaleyso awoodaheeda, ama ay u fulineyso hawlaheeda ama u gudaneyso waajibaadkeeda ku xusan Sharcigan;
   d. Arrin kasta oo xeerkan kamid ah oo loo baahan yahay in xeer-hoosaad lagu qeexo;
   e. Arrin kasta oo Hay'addu u araktoo inay lagama maarmaan u tahay ama ku habboon tahay habsamida fulinta ujeeddooyinka Sharcigan.

### Qodobka 42aad: Burin

Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la jaanqaadi Karin Sharcigan waa la baabi'iyey.

### Qodobka 43aad: Dhaqan-galka

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda.